



SO

Faraha la iska qaado iyo eurodac

Warbixinta Muwaadiniinta sadexaad ama dadka aan wadan lahayn ee la gu helo inay si sharci darro ah ku joojeen waddan xubnaha ka mid ah, sida uu qabo qodobka 29(3) xeerka (eu) no 603/2013.

Haddii lagugu helo inaad sharci darro ku joogitd wadan, 'Dublin katirsan¹⁾, maamuladu waxay qaadi karaan farahaaga waxayna u gudbinayaan kaydka xogta ee la dhaho "Eurodac". Ujeedada tan looga danleeyahay waxay tahay oo kaliya in la arko inaad horey magangalyo u dalbatay iyo inkale. Xogta farahaaga laguma kaydin doono kaydka xogta Eurodac, laakiin haddii aad horey magangalyo uga dalbatay wadan kale, waxaa dib laguugu diri karaa wadankaas.

Haddii farahaagu ay si cad u muuqan waayaan, oo ay ku jirto inaad si kas ah farahaaga dhaawac u gaarsiisay si aysan usoo bixin, mustaqbalka ayaa faraha lagaa qaadi doonaa.

Eurodac waxaa ku shaqeyaa Haayadda Midowga Yurub ee la dhaho euLISA. Xogtaada waxaa kali ah oo loo siticmaali karaa ujeedooyinka uu sharcigu qeexay. Waxaa xogtaada heli kara oo kaliya Sistamka Dhexe ee Eurodac. Haddii aad mustaqbalka magangalyo ka codsato wadan kale oo Dublin katirsan, faraha lagaa qaado waxaa sidoo kale loo gudbin doonaa Eurodac. Xogta lagu kaydiyo Eurodac lalama wadaagi doono wadan kale ama urur ka baxsan EU iyo wadamada la xiriira.

1) Waxay ku durugsantaaydhamaan Midowga Yurub Ayrlandi (IE), Biljam (BE), Bolaandi (PL), Bulgeriya (BG), Danmarki (DK), Faransa (FR), Fiilaan (FI), Giriig (EL), Hangari (HU), Isbayn (ES), Isloofaakiya (SK), Isloofeeniya (SI), Istooniya (EE), Iswiidhan (SE), Jarnani (DE), Jeeg Ribabliik (CZ), Karooshiya (HR), Khubras (CY), Laadfia (LV), Laxanbargi (LX), Litu'aaniya (LT), Malta (MT), Nedarlandi (NL), Ostariya (AT), Purtaqiis (PT), Roomaaniya (RO), Talyaani (IT), Yunaytidh Kiingidhoom (UK), iyo sidoo kale 4ta wadan ee la « xiriirta » Xeerka Dublin Noorwey (NO), Ayslaandhi (IS), Iswiisarlaandhi (CH), iyo Lijtenistiin (LI)

©Midowga Yurub 2014

Dib usoosaaridda waa la ogalyahay. Wixii isticmaalid ah ama dib usoo saarid sawirada shakhsiga ah, waa in ogalaansho laga dalbadaa cidda tooska u leh xuquuqda daabacaadda.

Warbixinta xiriirada

Ciwaan iyo wargelin dheeraad ah oo ku saabsan xafiiska qaxootiga

Bundesamt für Migration und Flüchtlinge (BAMF)

Frankenstraße 210

90461 Nürnberg

Taleefan: +49 (0)911 943 0

Faks: +49 (0)911 943 10000

limeyl: service@bamf.bund.de

Ciwaan iyo wargelin dheeraad ah oo ku saabsan baaraha Eurodac

Bundeskriminalamt (BKA)

65173 Wiesbaden

Taleefan: +49 (0)611 55 0

Faks: +49 (0)611 55 12141

www.bka.de

Haddii maamuladayada ay la noqoto in laga yaabo inaad wadan kale ka dalbatay magangalyo caalami ah kaasoo masuul ka noqon karay baadhista dalbashadaada, waxaad heli doontaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan nidaamka la raaci doono iyo sida ay u saamaynayso adiga iyo xuquuqahaaga.

